# Xalka Soomaaliya xaggee buu naga jiraa?

Qalinkii Saciid Cali Shire (saidshire@hotmail.com)

Oktoober 1992-dii ayaa Robinson, Madaxweynihii hore ee waddanka Ireland, waxay tagtay Muqdisho, caasimadda Soomaaliya. Sida uu soo guuriyey Keenadiid (2005), waxay aad uga danqatay dhibaatada iyo darxumada taala Soomaaliya. Dadkii la kulmayna waxay ku tilmaameen qof 'dareenkeeda bini'aadanimo iyo naxariiseed aan la hilmaami karin'. Laga soo bilaabo xilligaas, ilaa maanta, qof kasta oo mas'uul ah oo taga Soomaaliya – marka laga reebo Soomaalida, wuxuu si aad ah uga murugoodaa tacadiyaadka loo gaysti dadka, dalka iyo diinta. Waa yaabe, maxaa dulliga ina baday, maxaa damman inaka dhigay, dareenkii maxaa la tegay[1]. Maxaa dhinbishii iftiintaba biyo korka loogaga shubaa, ama sida Shube (2007) is waydiiyey '*Duruufaha maanta yaal; dhibtaan la dayaysan nahay; da'deen inalama qabtee; dalkeena maxaa ku furay'.*

Qoraalkan kooban oo laga soo raray buug dhowaan la daabici doono oo ka hadlaya hoggaamintu wuxuu marka hore toosh ku ifinayaa xiddidada dhibta Soomaaliya. Marka xigga wuxuu wax ka taabanayaa derbiga hortaagan horumarka iyo nabbada Soomaaliya. Ugu danbayn qoraalkan koobani wuxuu sawirayaa muuqaalka hoggaamiyaha soomaaliya u horkici kara nolol iyo nabaadiino.

## Xididada dhibta Soomaaliya

Duraafahaas goonida u noqday Soomaaliya, waxaa horkacayey hoggaan xun. Waxaase naxdin leh in hoggaankaas xumi uusan ahayn dad ajnabi ah oo la inoo soo diray, ee ay yihiin dad Soomaali ah oo magacooda iyo muuqaalkoodaba la yaqaan. Waa yaabe, xumaanta ma ku dhasheen, ma barteen, mise waa lagu khasbay. Qayb ahaan, waxaa la oran karaa, hoggaanka Soomaalidu (nooc kasta oo ay yihiin) xumaanta waa lagu ababiyey, qayb ahaan way barteen, qayb ahaanna waa lagu khasbay. Dhinaca abababinta, ilme kasta oo Soomaali ah, waxaa lagu habaa haruub uu ka buuxo 'reer-hebel'. 'Reer hebel' baa raggeenii laayey, xooleheenii dhacay, xaqeennii duudsiyey, 'reer-hebel' baa nolosha inaka hor taagan. Ilmahaas waxa qalbigiisa ku abuurma nacayb uu u qabo 'reer-hebel'. Ama sida Keenadiid (2009) laga sheegay '*qofka Soomaaliga ihi wuxuu kula colloobbaa markuu ogaado ciddaad tahay (qabiilkaaga)'*. Nasiib daro, ilmahaasi wuxuu la colloobaa dad uusan aqoon. Mararka qaarkood, waxaad arkaysaa, in dadka la isu dardaarmayo in ay is colaadiyaan yihiin dad ay khasab tahay wada noolanshahoodu: dad deris ah aan kala maarmin; dad is dhalay, wada dhashay, isku dhiig ah.

Dhinaca waxbarashada, markaad isha la raacdo qaabkii manaahijta Soomaalidu u qaabaysnaayeen, waxaad oran kartaa, manaahijtaas waxaa muhandisiin ka ahaa dad Soomaalida bohul u qodayey oo nacab ah. Waayo, wax kasta oo ummad is jeclaysiiya, isku tola oo waddaniyad iyo diin saldhig u yihiin ama meeshaba waa laga ilaaliyey ama waa laga been sheegay. Hadraawi oo arrintaas tilmaamayey wuxuu yiri '*Iskooladu waa dayayn; damiinimaday dhiggaan; duruustu falkay tiqiin; diktoor cadaway sideen; digree nacabay sideen; xaq bay garba duubayeey; diintay gibil saarayeen; waxay dadayeen umuur*'. Waxa intaas ka sii tiiraanyo badan, sida rag badan oo Cismaan Yuusuf ka mid yahay tilmaameen, in xataa, xantoobada yare e wax barata laga ilaalin jiray hoggaaminta oo aan loo dhiibi jirin wax xukun ah. Cismaan Yuusuf oo arrintaas tilmaamaya wuxuu

[1] Erayadaasi waxay ka mid ahaayeen heestii Cabdi Muxumud Amiin

yiri '*Teersana rag aan baran haddii talada loo dhiibay*'. Xaaji Aadan Af-Qalooc oo isna tilmaamaya sida dadka aqoonta leh looga hortaagnaa hoggaanka ummadda ayaa isna gabaygiisa 'Tabaalaha Waqtiga' yiri: '*Jaamacad nin tegey oo digrii tuu la yimi haysta; oo in uu dalkii wax u tariyo tacabba doonaaya; oo taana loo baahan yahay toogtan sida joogta; oo jaahil tigin adag dhidbaday taqaddumka u diiday'.* Mar kale isagoo la hadlaya Ina Cigaal wuxuu yiri *'Aqoon lala colloobiyo jahliga amarka loo dhiibay'.* Cabdi Muxumud Amiin, mar uu ka hadlayey miisaanka khaldamay ee maanta maanka iyo maskaxda Soomaalida ka guuxaya wuxuu yiri *'Wasiir beeli keentoow aqoon buuran maad lihid'*

Dad ay isugu darsameen ababin xun iyo tacliin jaahwareersan, ayaa waxay magan u noqdeen nacab aan u naxayn. Nacabku waa waddamadii la taliyayaasha iyo saaxiibada u noqday hoggaamadii soo maray Soomaaliya. Cismaan Yuusuf (Eebe ha u naxariistee) isagoo tilmaamaya hoggaankaas wuxuu yiri '*Magan bay shisheeye u yihiin meel la joogoba e; Maalin noolba niman baa ku fala waxay muraadaane; Maquunay u joogaan sidii maal la leeyahaye*'. Eebe ha u naxariistee, hadduu noolaan lahaa markii Shuuciyada la qaatay, ama xilligii dagaalka sokeeye, ama maanta oo gumaysi ma naxe ah magan loo noqday, oo uu hadba mid farta ugu yeerayo, muxuu oran lahaa?

Markaad isha la raacdid, baal-taariikheedka hoggaamiyayaashii soo maray Soomaaliya, waxaa kuu soo baxaysa in hoggaankii Cali Cilmi Afyare (Eebe ha u naxariistee) la dardaarmayey markuu lahaa '*Gudiyahay docdiinaa khalqigu wada deyaayaaye*' ay dhabahaantii ahaayeen kuwii Xaaji Aadan Af-qalooc lahaa *'wax badan baan dammiin dhega la'aa daasadow tumaya; ama nin ay indhuhu dam is yihii day waxaa iriye; dab baan mooday gaaraabidhaan daymadii hore'e; danbas iyo ramaad baaridaan naar ka dayayaaye; dacar iyo unuun baan ,macaan ugu dudaayaaye; doofaar ilkihi baan u filay dur iyo yaaquude'*, ' Hoggaankaasi ha horeeyo ama ha danbeeyo; dimoqraadi ha noqdo ama kaligiitalis; mid mabda' fiican (diin) xanbaarsan ha noqdo ama mid mabda' fool xun (gaalnimo) xanbaarsan, dhamaantood, waxa marag ma doonto ah in aysan u qalmin hoggaaminta Soomaaliya, ama siduu Singub lahaa '*xorriyo nin gayaa ha guursado*'. Afrax (2002) mar uu buuggiisa 'Dal dad waayey' ka hadlayey hoggaamiyayaashii soo maray Soomaaliya, wuxuu yiri: 'marka laga reebo dhalinyaradii SYL, oo ceebo kasta oo ay lahaayeen waxoogaa 'qiyam qaran-doonimo' maskaxdooda ku sii harsanaa, intooda kale waxay ahaayeen hoggaan xun'.

## Derbiga horyaal mustaqbalka Soomaaliya

Haddaan raggii hore halkaas dhignay oo ku tilmaamnay: kuwo lagu hungoobay; kuwo aan mudnayn in ay qabtaan hoggaan; kuwo dhalay dhibaatada ku habsatay Soomaaliya. Xagee joogaan, kuwa maanta isu soo mutuxay, si ay caynaanka ugu qabtaan ummad jiho khaldan lagu dheelmayey wax ka badan 100 sano. Hoggaanka maantu, waa derbiga ugu weyn ee horyaal mustaqbalka Soomaaliya, waayo: waa mirihii ay abuureen hoggaamadii xummaa; waa miro laga goostay geed ku baxay biyihii qabyaalada, jahliga, iyo caqli darada; waa miro ka soo go'ay beertii ay faleen acyaan aan xilkas ahayn. Waa niman, nooc kasta oo ay yihiin: waddaad iyo waranle; waxgarad iyo wax-ma-garad; waayeel iyo dhalinyaro aan fahansanayn culayska uu leeyahay waxa ay raadinteeda joog iyo jiifba u diideen. Waa nimankii Xaaji Aadan Af-qalooc ka dardaarmay markuu lahaa '*Mas'uuliyadu waa adagtahoo waa ammuur culuse; ardaal iyo nimaan qaadi karin looma aamino e'*.

Hoggaanka maantu, siduu u dhan yahay, wuxuu ku socdaa bohoshii raggii hore ku dhaceen. Qof kasta oo dhinac mara miisaankii Cali Cilmi Afyarena (Eebe ha u naxariistee) godkaas ayuu ku dhacayaa. Cali Cilmi Af-yare (Eebe ha u naxariistee) wuxuu ku tegay in uusan hoggaan qaban karin qof aan lahayn: Ikhlaas iyo cilmi.

DO NOT COPY

Camalka bini'aadamku qabanayo oo dhan waxa saldhig u ah labadaas shay. Rumaysnaanta Eebe waxa saldhig u ah 'cilmi', cibaadada nooc ay tahayba waxa saldhig u ah 'cilmi', ikhlaas iyo in lagaga dayday Rasuulka (SCW). Mire (2000) waxyaabaha la'aantood qof uusan hoggaamiye noqon karin wuxuu ku soo koobaa: waddaninimo, tacliin, hufnaan, karti badni, iyo bisayl siyaasadeed. Ragga maanta qooqan, hufnaantooda, kartidooda, bisaylkooda siyaasadeed iyo aqoontooda waa naqaane, booyaalow waddaniyaddoodu waa sidee. Qofkii raba in uu wax ka ogaado waddaniyadda raggaas ha akhriyo waraysi uu Malas siiyey asbuuclaha Times horaankii sanadkaan. Ragga maanta ku hardamaya hoggaanka siyaasada Soomaaliya, hoggaankaasi ha noqdo mid gobol (Puntland, Somaliland, Jubbooyinka, Muqdisho, iwm), mid dawladeed (waxa loogu yeero TFG), dhammaan waxay hayaan dhabihii fashilka iyo guuldarada. Raggaasi waa kuwa Shube (2007) ku tilmaamay '*Nasabday midab roggaan; taariikhda mugday gashaan; intii macna ley tiraan;....midnimaday diidan yiin; markii dhib jiray gamcaa;,..., maangaabkay urursadaan; mayeeraankay dulmaan'*

Ragga maanta u tafaxaytay in ay ku fariistaan '*kursi dhiig dhexdiis yaal'* waa kuwii Cabdi Muxumud Amiin ka yaabiyey ilaa uu yir '*horteen jire ma soo arag'.* Raggaasi waa jirjiroole, waa jinni labisan: maalin waa mooryaan, maalin waa waddani, maalin waa sheikh, maalin waa shariif, maalin waa shaydaan, maalin waa oday, maalin waa dhalinyaro, maalin waa aqoon yahan, maalin waa indhoole, maalin waa Islaam, maalin waa ardaal. Cabdi Muxumud oo sawiraya wuxuu yiri: *'hadda waa midiyo dhiig leh iyo mawdka wada yaale; marna culimo diin marisa iyo waa mufti iyo sheekhe; marna waa qabiil mudduga oon maryo lahayne; wixii ay xadiis noo marsheen way ka madhan yiine'*.

## Muuqaalka hoggaanka mustaqbalka Soomaaliya

Haddii aan raggaas ku tilmaamay hoggaan guracan, waa yaabe, side hoggaanka fiicani u egyahay? Sun Tzu (1500 B.C.), buuggiisa 'The Art of War' hogaamiyaha fiican wuxuu ku tilmaamay qof caan ku ah: garaad, kalsooni, bini'aadanimo, geesinimo iyo adayg. Du Mu (803 B.C.)oo ka mid ahaa raggii sharaxay buuggaas, wuxuu yiri: 'garaadku' waa awoodda wax lagu qorsheeyo; 'bini'aadanimadu' waxay la xiriirtaa jacayl iyo naxariis loo hayo shacabka; 'geesinimadu' waa in fursadaha laga faa'iidaysto; 'anshaxu' waa in kala danbayn iyi nidaam la abuuro. Jin Lin (618 B.C.) oo isna ka mid ahaa raggii sharaxay buuggaas wuxuu yiri: 'garaadka kaligiis ahi dadkuu hoggaamiyaha ka hor keenaa; kalsoonida faraha badani cidlay hoggaamiyaha dhigtaa; kalsoonida faraha badani waxay horseedaa kacdoon joogto ah; ad-adayga faraha badani waa axmaqnimo iyo naxariis daro'. Plato, ardaygii Socrates (470 B.C.) mar la waydiiyey qofka uu hoggaamiye u xulan lahaa wuxuu yiri: 'waxaan xulan lahaa kuwa beenta neceb, runta jecel, aan lexejeclada badnayn, dad la dhaqanka fiican, dhimashada ka biqin, xusuus fiicana leh'.

Gardner (1990), buuggiisa 'leadershp' wuxuu taxaa 14 sifo oo qofka lihi xaalad kasta, waqti kasta iyo goob kasta hoggaamin karo. Sifooyinkaas waxa ka mid ah: karti iyo dadnimo; garaad iyo qiimayn xaaladeed; aqoon xirfadeed; fahan dhamaystiran oo uu u leeyahay dadka uu hoggaaminayo; hammi sare; kalsooni iyo ammaano; dhabar adayg iyo la qabsi xaalad kasta. Kouzes iyo Posner (2002) si ay u ogaadaan muuqaalka hoggaamiyaha fiican ayay waraysi ka qaadeen dad sare u dhaafaya 75,000 oo ku kala nool daafaha adduunka. Dadkaasi waxay isku raaceen in hoggaanka fiicani leeyahay afar sifo: daacadnimo, aqoon, hiraal, iyo kicin. Maxell (2005) sidooyinkaas waxay ku daraan: dabci wannaag iyo dad la dhaqan; waaya'aragnimo la taaban karo; kalsooni nafeed; iyo ka hor imaansho xeerarka guracan.

DO NOT COPY

Robert Greenleaf, buuggisa, 'Servent Leadersheip', markuu ka hadlayo dadka mudan in ay wax hoggaamiyaan casrigaan, wuxuu yiraahdaa 'hoggaamiguhu waa adeege (servent): wuxuu maskaxda iyo maanka ku hayaa sidii dadka uu hoggaamiyo ay dhinac kasta u horumari lahaayeen'. Max DePree (1989) markuu sifaynayo hawlaha hoggaamiyaha adeegaha ah wuxuu yiri 'hawshiisa ugu horaysa waa bidhaaminta hiraalka; hawsha ugu danbaysaana waa in uu u mahadnaqo qof kasta'. Adeege waa ilaaliye, wuxuu ummadda uu hoggaamiyo ka ilaaliyaa waxa xun oo dhan.

## Gunaanad

Waxaan rajaynayaa in aan waxoogaa ka bidhaamiyey mastarad shacabka Soomaaliyeed ee qaaliga ahi ku cabiri karaan kuwa u soo tafaxaytay dhiigooda iyo dheeftooda. Inta aydan martiqaadkiisa tegin oo raashinkiisa cunin, horta hubiya in wixiisu xaalaal yihiin iyo in kale; inta aydan hadalkiisa dhegaysan, horta hubiya in uu run yaqaan iyo in kale; inta aydan ajandihiisa siyaasadeed waydiin, horta hubiya in uu adduunka ku nool yahay iyo in uu uun aakhiro yaha; inta aydaan la fariisan, horta hubiya in uu mudan yahay in lala fariisto.

Nin oday ah oo duullaan raacay, ayaa markuu dagaalkii dhamaaday isagoo dhaawac ah waxa qabtay raggii ay dagaalamayeen. Odayga laba leeb ayaa midna barida (salka lagu fariisto) ka taagan yahay, midna isha. Odaygii ayaa la waydiiyey, kee labada leeb lagaa bixiyaa. Odaygii wuxuu yiri 'aan hal mar fariistee, waxaad marka hore iga bixisaan kan barida'. Waxaan leeyahay, si aan hal mar u fariisano: aan indhaha furno oo fahano hoggaaminta. Si dadkii nala gudboonaa, ileen hadda dayaxuu u guuraye, aan uga daba tagno, aan barano hoggaaminta; si siyaasadda Soomaalidu madax iyo majo u yeelato, ileen hadda wax la garan waayey bay noqotee, aan barano hoggaaminta; si aan dhurwaaga iyo baraarka u kala garano, ileen hadda 'inagoo bakayle ka didnay baan aar bohoshii galnaye', aan barano hoggaaminta; si sharikaadkeenu u baraaraan oo magac iyo maamuus u yeeshaan, ileen hadda 'raq ku noole' bay noqdeene, aan barano hoggaaminta; si hay'aadka khayriga ah sida masaajida, madaarista, iwm u gutaan hawlihii loo sameeyey, ileen hadda 'god abeeso bay noqdeene' aan barano hoggaaminta; si aan nolol u helno, ileen haddii kale nolol heli maynee, aan arano hoggaaminta.

Waxaan oran lahaa, aan god dheer ku tuurno halhayskii khaldanaa ee Carta, 'xaq ma rabnee xal baan rabnaa'. Waayo, xalku wuxuu ku jiraa xaqqa. Aan baadigoobno hoggaamiye fiican: badbaadshe, bidhaanshe; balaarshe; baraarshe; hagge; isku tole. Aan raadino qof qaadi kara culayska, qof u naxaya shacabka, qof dareen dadnimo iyo diir bini'aadam leh. Yaynaan mar kale ku dagmin hadalada debecsan, koofiyada, khamiiska iyo hadalka oo lagu fur-furto amaanta Eebe iyo saliga Rasuulka.

Qoraalkan koobani wuxuu qayb ka yahay buug dhowaan soo bixi doona oo ka hadlaya hoggaaminta. Haddaad rabto in aad koobi hore u hesho e-mail u soo dir qoraha.

Saciid Cali Shire waa qoraa, cilmi bare, iyo la taliye. Buugtiisii hore waxa ka mid ah buugga 'Furaha Ganacsiga: Bilaabista, badbaadinta iyo kobcinta ganacsiga'. Buuggaas oo ah buuggii u horeeyey ee ka hadla ganacsiga, u qoran qaab cilmiyaysan waxa saldhig u ahaa daraasad qaadatay laba sano oo koobtay: xaaladda uu qofka Soomaaliga ahi ku sugan yahay inta uusan bilaabin ganacsiga; noocyada ganacsiga Soomaalidu xushaan iyo asbaabaha ay ku xushaan; qaabka ay fikrada ku helaan, qaabka ay u horumariyaan iyo qaabka ay u qiimeeyaan; asbaabaha keena in ganacsiyada Soomaalida qaar kobcaan, qaarna fashilmaan (dhintaan); duruufaha maamul iyo hoggaamin ee soo wajaha sharikaadka Soomaalida; qaabka ay suuqgeynta iyo xisaabaadka maaliyadda u sameeyaan; iyo qaabka ay isaga caabiyaan tartanka. Haddii buuggaasi uusan wali ku soo gaarin la soo xiriir qoraha, si uu koobi kuugu soo diro.